# Golaha Wakiilada JSl

## *Minuteska*

## Dooda Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2011ee Goluhu ka doodayo

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 21 Mudane waxayna Socotay 2 Maalmood, iyadoo bilaabantay 28/02/2011 dhamaatayna 05/03/2011kii,***

### 1. Xill. C/raxman Cismaan Caalin.

Anigu shakhsiyan, Markaan akhriyay buugii Miisaaniyadii hore ee Wasaaradu soo gudbisay Markaan aad uga baaraan degay documentskii ay inoo soo gudbiyeen gudiddu, Markaan eegay sida muga leh ee ay u hawlgashay Wasaaradu oo ku guulaysatay in sare u qaado Budgetka 70% miisaaniyadii 2011kii.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Hadii aynaan abaalgud siinayn Wasaarada inta aynu halkan ugu yeedhno, ***aynu qaadano nuxurka ay soo jeediyeen Gudiddeenu, oo aynu odorosgarayno miisaaniyada, oo aynu siidayno***.

### 2. Xill. Axmed Yaasiin Sh. Cali Ayaanle

Inagoo ka duulayna awoodeena dastuuriga ah, marka la eego baahida dalka iyo dakhliga aynu haysano xaqiiqdii dhibic badwayn lagu tuuray weeye, sababtoo ah markaynu dawladanahay baahida aynu daryeelka u qabno ee Caafimaad, waxbarasho, shaqo abuuriseed iyo amni marka aynu barbar dhigno dakhligeenu waa dhibicdaa bada lagu tuuray oo kale.

Markaa ilaahay ha inoo barakeeyee, dakhligaa yar ee kooban hadii loo helo maarayn wanaagsan oo daacadnimo ku jirto waxbuu wadi karaa, sidaa darteed.

Korodhka miisaaniyada ku baysgaraysan dakhli iyo kharash, markaa aduunyada waxaa lagu dedaalaa kharashkaaga inaad dhinto dakhligaagana badiso. Miisaaniyada tusaale ahaan waa macquul korodhka ku yimi 70% baa kordhay, waana mushaharkii macalimiinta, markaad barbardhigto tan madaxtooyada waxay korodhay 100% ina ka badan, inagoo dal faqiira ahna in kharashka madaxtooyada ku baxayaa $600,000 ku dhowaado inagay ceeb inagu tahay, waxaa kordhay kharashyadii unnecessary ahaa laakiin hay'adihii loo baahnaa in dakhligoodu, markaa kordho may kordhin. Halkaasi wax ka badan intaa oo ah baa looga rasmi ah bay u baahan tahay.

Waxaan kaloo taabanayaa, madaxwaynuhu khudbadii uu halkan inooga jeediyay wuxuu sheegay inay ku talagalsanyihiin in sanadkan la qabto doorashadii Golayaasha Deegaanka, miisaaniyadana kuma jirto taasna jawaab baan ka doonayaa oo su'aal baa igaga jirta?

Waxaan kaloo gudidu waxay inoo soo gudbiyeen in baanka dhexe dalbaday lacag ah 35 bilyan waxayna soo jeediyeen in lacagtaas laga ansixiyo, markaa lacagtaas waxaan leeyahay marka la

soo daabacayo in barlamaanku si trasparecy ah intuu u eego ayaynu siinaynaa inuu markaa soo daabacdo, laakiin maaha marka la soo daabaco in aynu u ansixino. Baahida loo qabona lacagtaasna waa inaan la eegnaa oo sharciga waa fajinaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In dakhligaa yar ee la soo odorosay sida loo ururinayo aynu dawlada ka taageerno.
- Dalku wuxuu u baahan yahay kayd, dukaan yar baan ka maarmin inuu guntiisa kayd dhigtee, dal dhan oo kayd lahayn siduu u socon karaa way adagtahay, markaa waxaan loo baahanyahay oo aan soo jeedinayaa in dakhligeenu kayd yeesho, marka laga reebo mushaharooyinka dakhliga waliba kan kharashaadka loogu talagalay in 30% kayd laga dhigo,
- In kharashaadka aan loo baahnayna la dhimo ***(unnecessary)*** oo aynu ee dib u eegnona waan soo jeedinayaa.

## 3. Xill. Cali Yuusuf

**Annigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- in wax laga badalo, waayo markaad sidaa u eegto miisaaniyadan dhinac kaliya ayay ka korodhay oo ah mushaharka oo kaliya, hase ahaate miisaaniyadu waxay ka timaadaa cashuur bixiyayaasha, waxayna ka filayaan miisaaniyada in horumar u keento cashuurta ay bixinayaan wadanka, markaa miisaaniyadii marakay ku dhacdo safarka dibada, martiqaad iyo shidaal dee ninkii cashuurta bixiyay anigu uma jeedo wax halkaa uga kordhaya, magaala madaxda kaliya oo dadkii haraad ugu dhimanaya kama muuqato inay wax uga kordhayaan, halkii miisaaniyada lagu dari lahaa, sidii biyaha wax looga qaban lahaa oo miisaaniyada wakaalada biyaha loogu dari lahaa siday biyaha u siyaadiyaan.

- Wasaarada maaliyada 2010 caafimaadka waxaa ugu jiray 60 milyan oo shillin S/l= 2011kan miisaaniyada waxaa laga dhigay 260 milyan oo shillin S/l=, waxaa u kordhay 200 milyan oo sh. s/l= ah, markaad barbar dhigtid hay'ada ugu shaqaale badan waa Ciidanka Qaranka, ciidanka qaranka 2010 (55 milayn) bay ahaayeen, 2011kana waa la gooyay oo (38 milyan) baa looga dhigay inagoo og ciidanka qaranku hawlihiisa iyo khataraha ay leeyihiin oo ay wasaarada maaliyada ka khatar badan yihiin. Booliiskuna waa la mid. *Markaa waxaan soo jeedin lahaa in laga gooyo wasaarada maaliyada oo ciidamada loogu daraa.*

- Mushaharka shaqaalaha iyo ciidamada iyaga waxba ka go'imaayaane, in meelaha shidaalka safarada dibada oo kale wax laga jaro, oo dhinaca biyaha ayaa inoog daran magaalo iyo miyiba in halkaa lagu daro ayaan soo jeedinayaa.
- Waxaa kaloo oo aan qabaa in miisaaniyadaha soo socda xaga horumarka iyo arrimaha bulshada awooda la saaraa, waayo inanka beeraha ka shaqaynayaa hadaanu qalabkii uu ku shaqayn lahaa iyo dhamaan wixii uu ku shaqa gali lahaa la siin dee mushaharkuun

buu sugayaa, markaa miisaaniyadaha danbe waa in lagu soo daraa arrimahaas, waad mahadsantihiin.

## 4. Xill. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde

Marka hore waxaan bogaadinayaa wasaarada maaliyada oo soo dadaashay iyo gudidda dhaqaalah oo warbixin dhamaystiran oo dhaxal gala keentay, intaba waan bogaadinayaa. Waxaan jeclaa oo loo baahanyahay in miisaaniyadu saxiixnaato sida liifaqu u saxiixanyahay, intaa ka dib waxaan samaynayaa in yaroo mulaaxidaada ah.

Miisaaniyadani waxay ahayd in mid macluumaad badan ku jiraan, sida wax soo saarka beeraha iyo warshadaha sanadkiiba dagalka soo go'a, waxaynu dhoofino iyo waxaynu la soo degnoba, waxaan kaloo jeclaa GDPga ratio cashuur noqonaysa, sidoo kale waxaan ahayd in la ina siiyo oo hore dhowr jeer u waydiiyay wasiirka Hay'adaha ina caawiya ee wasaaradaha caawiya resourceka ay keenaan inuu ku jiro, intaasi way qorxin lahayd miisaaniyada waana in lagu soo daraa miisaaniyadaha danbe.

Warbixintii gudidda, waxay gudidu inay hagto iyadu oo analysis samayso oo ay eegto kharashka dawladu galayso kan daruuriga ah iyo kan aan daruuriga ahayn ee laga guuri karo ama la dhimi karaa, waxaa kaloo ay ahayd in gudiddu sheegto kharashyada la odhan karo yaanay halkooda dhaafin oo 2010kii yaanay dhaafin la odhan karo oo halkeeda aanay dhaafin,

Hadii dakhligu soo gali waayo eed baynu ku yeelan karnaa inaga laftigeenu, iminka ka soo qaad Cashuuraha bariga, waa cashuurta ugu addag ee la soo ururiyo 109 bilyan baa qoran, dhibaatooyinka ka hor imanayaa waxaa weeye sharciyadii iyo xeerarkii lagu qaadi lahaa ma la adkeeyay oo wax ma lagu daray si ay u soo hoydaaan, personality iyo administration capacity kii sare ma loo qaaday dadkii iyo qalabkii lagu ururinaya ma la diyaariyay? waxaasi waa waxyaabaha iska horkeena dadka iyo Wasaarada, marka la yidhaahdo qofkii intaa keen, sharcigii iyo habkii loo qaadi lahaana diyaar aanu ahayn, dhibaatay keenaysaa, markaa waa intaas la diyaariyaa inan wasaarada kala shaqanaa.

Waxaa kaloo ka muuqda miisaaniyadan itemkale oo sida loo ururiyaana ay adagtahay oo 38 bilyan ah oo isgaadhsiin ah, waynu ognahay sharcigii iyo xeerkii diyaar maah, farsamadii iyo spectrum kiina diyaar maaha, isku xidhkoodii diyaar maaha, dadkii iyo administration lacagta intaa la eeki ka soo xeroonaysay diyaar iyana maaha, waxaa kaloo jira shirkada isgaadhsiinta

Dhakhliga *Inland tax waa 109 billion, 97 ka midina waa Hargeisa*, Sharciyadii, qawaaniintii diyaar ma yihiin? Human resourcekii ma loo qaaday kor ileen korodh baa yimi, Hadaan la samayn *local government personnel training* waxay keeni conflict.

Waxa kale oo ka muuqda *revenueka post & telecommunications 38 billion*. Diyaar maaha *spectrum waves, interconnectionkii*. Stakeholderka ayaa ku jir telecommunication halkaana conflict baa ka imankara. ,TV qaranka waa in dib loo noqdo oo 3 times ayuu kharashkiisu badan

yahay, Qarsoorka, Maxkamadaha, Asluubta, Wasaarada Cadaalada iyo Madaxtooyadu wax isu dhigma maaha, markaa waa in dib loogu noqdaa, 16 billion kharash lama filaan ah iyo gurmad, waa in lasameeyo 16% of budget.,Waa in la sameeyo security reserve fund oo isaguna treasurygu gacanta ku qabanayo oo inagu ansaxiyey.

**Soo jeedin:-**

- I*n 30% kharashaadka Miisaaniyada ah kayd qaran laga dhigo, oo Mushaharooyinku aanay ku jirin.*
- *In hay'adaha aan sharciga ahayn ee Miisaaniyada Ku jira aynu sharciyayno marka hore oo sharcigoodii Golaha la horkeenaa, markaa ka dib Miisaaniyadooda loo sii daayaa.*

## 5. Xill. Maxamed Saalax Cige.

Ugu horayn waxaan ku taageersanahay mudanayaashii igu horeeyay in wasaarada aynu kala shaqaynu sidii dakhligaasi u soo xeroon lahaa, hadaynaan kala shaqayn inaga iyo iyagaba way fashilmayaan,

Hadaan u imaado miisaaniyada, markaan eegay run ahaan wax badan baa kuu soo baxaya, tusaale ahaan marka la isbarbar dhigo inta ku jirta miisaaniyada ee wasaaradaha iyo qasriga madaxtooyada farqi badan baa u dhexeeya, waxaadna moodaa 6 wasaaradaha iyo hadaad eegto 6 hay'adood oo xidhiidh la leh madaxtooyada waxaad moodaa intuba inay ka miisaaniyada badan yihiin intaa oo Wasaaradood, waxaan odhan lahaa arrinkaa dib ha la eego, si aan loogu arag in miisaaniyada badankeedu meel kaliya ku shubmayso oo musuq ka jiro, waxaan Golaha u soo jeedin lahaa, In Madaxyada ***(headed)*** ka noocaas ah la isu qiyaaso.

Waxaad moodaa durba in wax yaalo badan oo miisaaniyada aan ku jirin laga cabanayo, tusaael ahaan wasiirada waxbarashada maalintii ay guurtida warbixinta siinaysay waxay cadaysay oo tilmaantay in wax badan oo aanay filayn markii macalimiintii lacagtii laga dhimay oo iskuulkii bilaashka laga dhigay, in wax badan oo ayna filayn ku soo baxeen oo aan miisaaniyadana noogu jirin, markaa maadaama aan masuuliyiintii qarankaa aynu nahay meelaha durba cabashadu ka timi, ee wasaaradaha ah, in hay'adaha dheeraadka ku ah wax looga soo jaro si markaasi ay wasaaradaheeniina ay inoogu shaqeeyaan wax badan inagu soo bixin.

Sidoo kale hadaad wasaaradaha qaar eegto, sida wasaaradaha Maaliyada, Xanaanada Xoolaha, iyo Caafimaadka waxaad moodaa in kharash badan u dhaxeeyo, iyadana waxaan odhan lahaa, Wasaarada Maaliyada wax ha looga soo jaro si Wasaaradahaa awooda bulshada aad ugu xidhan wax loogu sameeyo, sidoo kale ciidanka Qaranka oo aad u balaadhan in iyagana la xoojiyo, oo hay'ad kaliya ayaa ka miisaaniyad badan.

Waxaa kaloo in wax la iska waydiiyo, hay'ado badan oo aan sharciyays nayn oo miisaaniyada ku jira, sida wasiirka dhowr jeer maalintii dhowayd loo waydiiyay, markaa iyagoon sharciyaysnayn hadii miisaaniyada loo siidaayo waxaa laga yaabaa, inay sanadka danbena sida ugu jirayso, sidaa darteed waxaan qabaa in wixii sharciyaysana Miisaniyada loo siidaayo, wixii aan sharciyaysnayna si loo sharciyeeyo dib loo hakiyo, halka miisaaniyadahaasi ku jiraana dalka kayd looga dhigo, sida Baanku gudidda u sheegay in dalku aanu kayd lahayn.

Markaad miisaaniyada akhrido, waxyaabaha aan wax iska waydiiyay ee aan calaamadiyay waxaa ka mid qodobada wasaaradu ku tilmaantay in miisaaniyada sanadkan daboolayso waxaa ka mida hagaajinta baanka dhexe, markaa hagaajinta baanka dhexe hay'ad baa u nidaamsan oo qaabilsan maantana shaqaynaya, warbixinta gudiddana kama muqato qaybtaa, markaa waxaa iswadiin leh ma wakhtiyada danbe ayuu arrinkani imanayaa, ma lacagta baanku soo daabacayo ayay ku jirtaa, wali calaamatul su'aal baa iga saaran.

Waxaan tabayaa sidoo kale, wax in badan aynu u baahanay, dhibaatooyinka wadooyinka, waxaan odhan lahaa maadaama kharashaad badan oo miisaaniyada ku jiraa ay jiraan oo aan baahi badan loo qabin, in wixii baahi badan loo qabo lasoo hor mariyo oo kharashaadka safarada oo kale aynu ku badalano, oo wadooyinka iska hagaajino, taasna waan ku kordhin lahaa oo sanadkan miisaaniyada wax lagaga daro.

Lifaaqa la socda iyo lifaaqa wasaaradu wax ka badal ku soo samaysay, markaa lifaaqa 1aad ee miisaaniyada la socday waxaan odhan lahaa wuxuu u baahan yahay in xeerarkii cashurahaasi u baahnaayeen golaha la horkeeno oo gudiyadu ka hawlgalaan, taana waan soo jeedin lahaa,

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Miisaaniyadu runtii way fiican tahay, waxay u baahantahay oo kaliya inay habayno oo wax ka badal ku samayno, ka dib markaa aynu ansixino.

## 6. Xill. Axmed Maxamed Diiriye Nacnac

Maanta miisaaniyada inaynu mudadaa haysano may ahayn, oo inaan degdeg u ansixino bay ahayd, waxaana jira xildhibaano badan baa kharashka madaxtooyada ka hadlay, maanay fahmin baan u malaynayaa madaxtooyada Hay'ado badan baa ku jira.

Lacagihii total iyo kuwii kale ee miisaaniyada aan lagu soo dari jirin, iminka iyadoo waadax ayay miisaaniyada ku jirtaa. Tan kaydkana waa markii ugu horaysay ee dawladu miisaaniyad samayso ciidamadii iyo shaqaalihii ayaa loo kordhiyay in wax laga jarona ma yeelayno.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Inagoo faraxsan oo dadkeenu inagu dayan doono, waxaan leeyahay miisaaniyada aan ansixino. Wa bilaahi tawfiiq.

## 7. Xill. C/raxmaan Maxamed Jaamac.

Waxaa jira meelo kharash badan lagula dul dhacay oo ay ka mid tahay Tvga. Oo aan Haleeya aan dhaafin local ahaan, waxaana loo kordhiyay Tvga saddex-laab Miisaaniyada sanadkan.. sidoo kale Madaxtooyada waxaad moodaa kharashkeedii iyana wuu afar laabmay,Wasaarada maaliyada ayaa iyana aad u miisaaniyada badan oo waxbarashadii ka miisaaniyad badan oo iyadaa ugu kharash badan wasaaradaha marka laga yimaado madaxtooyada.

Anigoo tixraacaya miisaaniyada Beyjeka saddexaad waxaa ku qoran meelaha dakhliga laga soo ururiyay waxaana ku jira dakhli badan oo aan ku dhici jirin miisaaniyada kuwaas oo lagu soo wareejiyay wasaarada maaliyada ku was ayna ka mid yihiin, qay ka mid khidmadii maxjarka markaa qaybtii kale xagay qabatay/ sidoo kale shan madax xigeen oo laga soo wareejiyay dekada iyana shan madax xigeen ka badane intii kale meeday? .

Odoroska dakhliga cashuuraha barigu waa kan ugu dhibta badan sida loo soo ururiyo macquul maaha in la yiraahdo 109 bilyan baan ka soo saarayaa wayna dhib badan tahay sida loo soo ururiyo. Wasaarada isgaadhsiinta wuxuu ku sheegay boga 5aad shuruuduu ku xidhay iyadoo laga filayo dakhli fara badan 38 bilyan ah. Shuruudaha uu ku xidhay sida warqada gudiddu inoo soo gudbisay ku qoran waynuna ognahay inta lala soo daalaa dhacayay wayna adagtahay sida loo hirgaliyaa markaa in miisaaniyada lagu soo daraa waa mid adag bay ila tahay aniga.

Miisaaniyadu waxay korodhay 70% waxayna u korodhay kharashaad xaga safarada dibada, martiqaadka iyo shidaalka, markaa maxaa dadkii loo kordhiyay, waxaan leeyahay kharashaadka aan daruuriga ahayn in caasimada biya loogu helo, waxaa soo hadhana kayd qaran aan ka dhigno oo Golaha wakiialda markasta ha laga ansixiyo,

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- in Wasaarada Maaliyada gacan laga siiyo dakhligaa ururintiisa oo inagu aynu qay ka qaadano sidii dakhligaa wasaarada ugala shaqayn lahayn soo xerayntiisa, iyadoo xaafada New Hargiesa oo guryo badan ku shufbeeleen laga daayo sanadkan cashuurta kirada iyo cashuurta mulkiyada.
- In kharashka Wasaarada Maaliyada iyo Madaxtooyada aad loo dhimo oo dadka caasimada biyo loogu qodo.
- In Hay'adaha aan sharcigooda la ansixin in kharashka miisaaniyada loogu soo daray la hakiyo inta la ansixinayo ka dibna miisaaniyada Supplementary budget loogu sameeyo marka la ansxiyo sharciyadooda.

## 8. Xill. Cali SH. Ibraahim Aareeye

Waxaan aad moodaa Miisaaniyada in meelaha qaar la tuulay meelana ay aad u hooseeyaan, wasaaradaha qaarkood sida wasaarada beeraha, xanaanada xoolaha iyo macdanta iyo biyaha oo loo baahnaa in miisaaniyada wax ku oola loo sameeyo oo xooga la saaro lama saarin.
Miisaaniyada gabigeeduba waa kharashaad, waxaana cashuuraha bariga ayaana ugu adag meesha laga soo saarayo miisaaniyadan, waxaana fiicnayd in cashuuraha bariga horta loo sameeyo sharcigeedii qaban lahaa ee lagu soo ururin lahaa.

Tusaale ahaan 38 bilyan ayaa wasaarada boosaha laga sugayaa, wasaaradiina isku xidh lama samayn nadaamki lama samayn iyo sharcigeediiba magaran karno lacagtaasi siday u soo xeroon doonto Illaahay oo in astura mooyee, waxaan jeclaa in miisaaniyada laga sameeyo kayd qaran oo aan waligeed miisaaniyadihii dalka soo maray laga samayn, kaydkaa qaran waxaa laga goynayaa boqolkiiba 30% hay'adaha qaranka marka laga reebo, ciidamada qaranka, booliiska, asluubta iyo ciidamada xeebaha oo iyagu nabadgalyada ka shaqaynaya. Umada aad kayd qaran lahayn way adagtahay dawladnimadeedu.

Banka dhexe ee dalku qasnad buu iska noqday, waxaa loo baahanyahay in laga dhigo bangi qaran oo wax laga amaahan karo oo tasarufaad leh in laga dhigo ayaa aad muhiim u ah, waayo haduu dalku bangi dhexe oo tasarufaad leh aanu lahayn waa allow sahal, sidoo kale waxaa jira hay'ado aan golahani sharcigarayn oo miisaaniyada ku jira, hay'adahaasna mushaharkooda waa inay iska qaataan, laakiin kharashaadkooda ilaa la sharciyay nayo oo 30 cisho oo maanta laga bilaabo sharcigoodii golaha la horkeenaa, marka la sharcigareeyo miisaaniyadooda loo ansixiyaa.

**Waxaan ku soo gabo-gabaynayaa:-**

- in miisaaniyadan aadka u quruxda badan in wixii laga badalayo ee aan sheegay xildhibaanadii horena sheegeen wax laga badalo loo ansixiyo.
- In wasiirka maaliyada Hiil qaran loo sameeyo ilaahay waxaan ka baryaynaa in wasiirka uu ku asturo miisaaniyadaa, inaga gacan ka siino oo ganacsatada iyo dadka cashuurta lagu leeyahay bixiyaan.

## 9. Xill. Ibraahim Caraale Cabdi

Sida mudane kastaa ka markhaati kacay miisaaniyada inay tahay miisaaniyad ka duwan kuwii hore oo tii 2010kii ka badan 70%, inay tahay miisaaniyad ay keentay dawlad 7 bilood jirtay oo amaan aad iyo aad u badan ku leh waxaana ku amaanayaa xukuumada oo dhan ee wasaarada kaliya ku amaani mayo, waa miisaaniyad kobcinaysa oo xanaanaynaysa shaqaalaha iyo ciidamada dawlada meelay joogaanba, markaan intaas oo wanaaga oo aanan soo koobi Karin, waa miisaaniyad inooga baahan taageero iyo inaynu isgarabtaagno.

Waa miisaaniyada ay ka muuqato kharashyo badan oo hore loogu kariwaayay dawladii hore inay ku soo darto golahanina in badan ku qaylinayay oo maanta khasnadii dawlada ku dhacaya, Miisaaniyadani waa mid amaan mudan oo in laga garab galo mudan, wayna soo baxaysaa hadaynu garabgalno waliba in kabadan baa ka soo bixi karta, miisaaniyadan dadkii shaqaynayay baa xooga la saaray oo shaqaalihii iyo ciidamadii baa mushaharkii loo kordhiyay, markaynu korno ayaynu iyana horumar iyo u qoondayn doonaa.

Qasriga madaxtooyada waxna waa laga dhimay waxna waa lagu kordhiyay, waxaa laga dhimay 4,973,752.640 halkii ay u kordhi lahayd 70%, halkan waxaan ku ansixinay xeerkii Mushaharooyinka Madaxwaynaha, ku-xigeenkiisa iyo Golayaasha Qaranka, xeerkaasi Qodobkiisa 7aad farqadiisa 7aad wuxuu madaxwaynaha iyo ku-xegeenku waxay yeelan karaan miisaaniyad u gaara socodsiinta hawlaha qaranka, markaa ilayn la cadibimaayo si hawlaha qaranku aanu u socon, oo dhamaan wixii madaxwaynaha ku dhici jirayna khasnada dawlada lagu shubo siday bay u dhici kartaa in maanta la yiraahdo waxbaa loo badiyay. miyanuse barbar dhigi karnaa madaxtooyada qarankan oo dhan uu igmaday oo wasaaradaha maamusha oo tii wax ka dhimaan ay iyada tagayso in wasaaradaha aynu barbardhigno.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Miisaaniyadan 2011 lagu ansixiyo sida uu yahay inagoo taageerayna warbixintii Gudidda oo aad u soo lafagurtay

## 10. Xill. Faarax Maxamed Cabdule

Anigu wxaan soo jeedinayaa:-

- In wixii khaladaada ee halkan laga sheegay ee ahayd in miisaaniyadan wax looga qoondeeyo mashaariicda horumarineed, waxaan Xukuumada u soo jeedinayaa inay wixii ka danbeeya sanadkan mashaariicda horumarineed si dadwaynaha wax loogu celiyo wax loogu qoondeeyo laba ama saddex mashruuc.
- In loo qoondeeyo miisaaniyada sanadka danbe Kayd qaran loo soo sameeyo, oo sanadka danbe miisaaniyada ay ku jirto, tan aynu ansixino.

## 11. Xill. Axmed Maxamed Obsiiye

Miisaaniyadan 2011 waxay ka turjumaysaa dedaalka, daacadnimada iyo wax qabadka ay dawladani muujisay ee dhinacyo badan ka samaysay mudadii koobnayd ee xilka ay haysay, iyadoo xukuumadani tii ka horaysay dayn fara badan ka dhaxashay, mushaharooyinkii horena wada bixsay, Mushaharka sanadkan Ciidamada iyo shaqaalaha way u kordhisay, waxbarashadii oo bilaash ay ka dhigtay, intaas oo dhan xukuumada Hirgalisay way dedaasahy.

Miisaaniyadani waxay ka kooban tahay Korodhka Mushaharooyinka, dhinaca daryeelka iyo horumarinta waxay u baahan tahay wakhti in la helo, markaa Miisaaniyadani waxay muujisay duruufo badan, waxaan soo jeedin lahaa in tirada shaqaalaha iyo ciidamada la xuso si loogu xisaabtami karo, Hay'adaha aan sharigooda Golahani la horkeenin ee miisaaniyada ku jirana waxaan soo jeedinayaa in Golaha la horkeeno oo sharciyadooda la ansixiyo.

Xukuumada cusub oo balan qaaday inay ku soo darto hay'ad dakhli galin ah oo cusub oo dhiirigalinaysa dakhliga dalka, Hay'adaas oo ah diiwaanka sakada sharciga iyo dastuurkuna ogolyahay qaybna way ka ahayd waxyaalaha la dalbanayay in lagu soo daro, markaa waxaan dalbanayaa in Hay'adaa lagu soo daro oo kobcinaysa dakhliga Somaliland iyo miisaaniyadeeda, markaa waxaan soo jeedinayaa in si dhakhso ah loogu soo daro sharci taageera diiwaanka sakada si loo helo dakhli dheeraad oo taageer Miisaaniyada Somaliland.

Sidoo kale waxaan qabaa in helo dayntii xukuumadii hore ka tagtay intay ahayd iyo inta la bixiyay in miisaaniyadaha lagu soo daro si loogu xisaabtamo, dib u habaynta cashuuraha iyo tacriifadaha lifaaq bay wasaaradu ku keentay, lifaaqaa anigoo taageersan waxaan shacabka Somaliland inay waafaqaan lifaaqaa, iyo in lagu daro xeerarkii cashuuraha iyo tacriifadaha si loo fududeeyo fahankeeda dadkuna u qaataan.

Miisaaniyada waxaa kaliya oo sheegayaa waa Miisaaniyada Jamciyada Sooyaal oo laga dhimay hal milyan, taana waxaan soo jeedin lahaa in loogu celiyo way mudan yihiin intaa iyo wax ka badane, xaga mashaariicda horuamrinta waxaa ku sanadkan qodob kaliya oo ah badelka lacagta burco iyo Tvga qaranku siduu dalka oo dhan u gaadhi lahaa. Waana loo baahanyahay in kuwa kaloo badan lagu soo daro sida wadooyinka burco iyo ceergaabo iyo dila Miisaaniyada waxaa kaloo maqan doorashayoonkii dawladaha hoose oo madaxwaynuhu sheegay in sanadkan dhacayso taana waxaan soo jeedinayaa si aanay u baaqan doorashadaasi in wax lagaga daro.

## Waxaan soo jeedinayaa:-

- In miisaaniyada la ansixiyo, iyadoo la tixgalinayo waxyaalaha muhiimka ah ee asaasiga ah ee aan laga tagi Karin. Wa bilaahi tawfiiq.

### 12. Xill. Axmed Barkhad Obsiiye

Miisaaniyadu waa miisaaniyada qaranka yaan la siyaasadeen, waxaana wasaarada ugu mahadnaqayaa korodhkaa ay kordhisay, tan kale waxaan leeyahay miisaaniyadu waxay leedahay mad-madaw faro badan inay la ga saaro ayaan soo jeedinayaa, hadii eegto miisaaniyada ciidanka booliiska liifaaqa waxbaa ku qoran, buugana waxbaa ku qoran, markaad eegto (**66,517,330,963**) marka danbena waa (**66, 187,107,994)** markaad labadaa kala goyso iyo lifaaqa inta lagu soo qoray ee ah ( **340 milyan)** ayaa loogu daray iskuma balancegaysna markaa meesha lacagtaa lagu daray ha la cadeeyo.

Waxaa la inoo sheegay in bangigu soo samaynayo lacag, lacagtaas oo **35 bilyan** ah, lacagtaasina miisaaniyada kuma jirto, waxayna inoo sheegeen in laba loo qaybinayo oo **20 bilyan** kayd qaran

laga dhigayo **15 bilyan** lacagta burco lagu badalyo markaa lacagtaas odoroska miisaaniyada kuma jirto taana waa in lagu daraa oo la cadeeyaa oo wasaaradu mad-madowga ka saartaa. Lacagta madaarka Hargiesa, Gudiddu waxay inoo sheegtay in madaarka $10 milayn lagu samaynayo oo dhawaanba soo baxayso, iyana odoroska Miisaaniyada kuma jirto, waxaan leeyahay wasaaradu mad-madawga ha ka saarto oo ha lagu soo daro Miisaaniyada.

Mida tacriifada cashuuraha ee wasaaradu lifaaqa ku keentay sideeda ha loo daayo, waayo iyagaa og siday u helayaan, qiimaha Dollarka ee dhacay wasiirkuna wuxuu had iyo jeer ku tiraabaa inuu kor u qaadayo, dollarka isagu shaqo kuma laha ee shillikeena ayuu masuul ka yahay markaa shillikeena ha la ilaaliyo mushaharkii shaqaalaha iyo ciidamada u kordhay waxba u tari mayso hadii kale.

## Waxaan Soo jeedinayaa:-

- Miisaaniyadu waa miisaaniyadii Qaranka dalkaana ku shaqaynaya, markaa sida wasaaradu u soo qortay in loogu ansixiyo ayaan soo jeedinayaa.

### 13. Xill. Siciid Cilmi Rooble

Miisaaniyadan wasaaradu dedaal badan ay samaysay iyo korodh badanba, waxay wasaaradu inoo sheegtay in ganacsatadii waaweynady aanay waxba ka helin oo ay taagan tahay in liisamadii laga qaado ama golahan iyo xukuumadoo isku jirtaa dedaal dul saarto, taas macnaheedu waxaa weeye in waxan la qoray inay soo baxayso ilaahay uun baa og, waxaana filayaa in labadaa bilood deficit lagu jiro sida xisaabiyihii xilka laga qaaday sheegay in 26 bilyan oo deficit ah dalku jiro.

Anigoo tixgalinayo waxyaabahaa waa in golaheenu baaq cad u jeediyaa ganacsatadaa waaweyn iyo xawaaladaha, markaa waxaa loo baahan yahay inay go'aamadeena ka soo baxdo oo aynu baaqaa u jeedino umad dalka wixii qabanaysa hadana cashuurtii aan bixinayn, mar hadii aynaan garanayn inay waxani soo baxayaan, qarankuna aanu kayd lahayn, hadii abaar ama aafo timaadana Ilaahay inaguma keenee la odhanayo ganacsatadaay oo la shaxaadayo, mar hadii aanu baankeenu faaruqyahay oo aanu lahayn wuxuu ku tasarufo, markaa waxaas oo dhan tixgalino waa in miisaaniyadan kayd qaran ka samaynaa, si dhibaatadaa uga baxno, waa in 30% marka laga reebo mushaharooyinka, kharashaadka kale waa in loogu jaraa Kayd Qaran waana dastuuri.

Lacagtaas shan ciidan ka jari mayo ciidanka qaranka, Ciidanka Booliiska, Ciidanka Asluubta, Ciidanka Xeebta, Ciidanka Sirdoonka iyo Ciidanka Madaxtooyada oo iyagu amnigeena ilaalinaya, wixii kale oo macal Golaha Wakiiladu ku jiro waa in laga jaraa, Halkaa lacag $14 milyan ah ayaa kayd qaran noqonaya.
Si aynu raad wanaagsan uga tagno, miisaaniyadan hay'ado badan oo aan la ogolaan sharciyadooda ayaa ku jira, waa inaynu sharciga isticmaalnaa oo wixii mushaharka ah loo siidaayaa Hay'adahaas, wixii kalena mudo 30 cisho ah sharciyadoodii ha lagu keeno oo markaa ka dib ha loo sii daayo Miisaaniyadooda, wixii cashuur iyo takaaliif ee la qaado oo aan soo marin Golahani waa Qayru sharci Airiportka cashuur baa laga qaadaa 2% ah oo Wasaarada Duulista iyo Hawada qaadaa, waa in la joojiyaa hadii kale tacriifadahan lagu soo daraa.

Madaxwaynuhu wuxuu halkan inooga sheegay doorashooyinka Dawladaha hoose sanadkan inay dhacayso, waa in la qabtaa kaydkanina waxyaalaha uu inaga caawin doono waa waxyaabaha ka mida haday doorasho timaado kaykan aynu samaynayno ayay ka qabanaynaa, taana ha la is waydiiyo kharashkaa dawlada hoose ilayn meesha kuma jiree.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Waxaan ku soo gabo-gabaynayaa markaynu intaa hore aan u sheegay aynu samayno iyo xeerarka aan ka sugayno Hay'adahaa, Miisaaniyadaasi ha inaga baxdo oo Isniinta aan Ansixino.

## 14. Xill. Maxamed Cali Xirsi

Waa Qodob dastuuri ah inaynu miisaaniyada inaan wax ka badalno oo ansixno, xeer ayaa ina siinaya awooda aan wax kaga badali karno xeerkaasi waa xeerkii ugu miihiimsanaa ee ay ahayd inaan shantaa sanadoo samayno, ugu horayn miisaaniyadu maxay kaga duwantahay 5 miisaaniyadood ee aan hore u ansixinay, waxaa ka mid wax ayaabaha ay kaga duwan tahay 5 sanadood in ka badan kala badh ayaa sanadkan oo kaliya kordhay oo ah 70%, mushaharkii shaqaalah iyo ciidamadana 100% baa la kordhiyay, iyo waxyaalo kale oo badan, waana guul ay dawladu gaadhay.

Miisaaniyadan kuwii hore waxay kala mid tahay:-

1. Kharashkii oo sidii hore loo isticmaalayo iyadoo wasaaraduhu aanay u baahnayn oo waliba kordhay.
2. Xisaab xidhkii aan hore u soo raaci jirin oo aan tan la soo raacin.
3. Hay'ado aan sharciyaysanayn oo Miisaaniyada ku jirta, oo ah dastuur jabis in lagu soo daro looguna ansixiyo.

Waxyaabahaan ka eegaynay ma ka jawaabaysaa, Ictiraaf ma ka jawaabaysaa, waxbarasho ma ka jawaabaysaa, shaqo abuuris ma ka jawaabaysaa, waxaas oo dhan ma ka jawaabaysaa sida nabadgalyada shantaa sano ee miisaaniyadu jirtay nabadgalyo ayay ahayd in ciidamada la galiyo dalka dakhliga ka soo baxa inta badan, hadana waxaan ognahay ciidamadu inay yihiin kuwa ugu mushahar hooseeya, inay yihiin kuwa ugu dhibtu hayso ee iyagu tabaalaysan, markaa waxay ila tahay in ciidamada waxani inay gaadhaan in guddi loo saaro oo waajib ina saaran tahay.

Meesha ugu badan ee musuqmaasuqu ka dhacayo waxaa la galiyaa kharashaad dunida ama inaga ha noqotee, hay'adaha kharashaadkoodu inuu ka bato tan shaqaaleheeda maaha, bal eega hay'adaha tuseelna u soo qaata Golaha Guurtida ama Golaheenaba, mid kasta sidaasaa safaradu u badan yihiin, habeen dhaxyadu u badan yihiin, martiqaadyaduna waa sidoo kale, kharashaadka yar yar ayaa xataa jira, isku soo duuduub waxaas oo kharaashaad ah ee Goloyaasha iyo Wasaaradaha loo qoondeyeey in la fahmo ayaa loo baahan yahay, anigu fahmi mayo?\ hawlaha lagu qabano ma cada, taasaa waxay keentay in dakhligii iyo kharashaadkii isku go'aan.

Wasiirka Maaliyadu wuu dedaalayaa, laakiin siduu u dedaalayo Wasaaradaha kale u dedaali maayaan, mana soo koobi karo waxa kharashaad aan la fahmayn waxa lagu qabanayo, Gudiddu waxay soo jeedisay inaan duuduub ku ansixinio, waxaan qabaa fikir kaa ka duwan oo option kale ah.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In aynu kayd qaran samayno oo 30% kaa mudanayaashii iga horeeyay sheegeen marka laga reebo Mushaharooyinka iyo kharashaadka Ciidamada oo dhan.
- In hay'adaha aan sharciyaysnayn ee Miisaaniyada ku jira, ilaa la sharciyeeyo oo halkan sharicgooda aanay ka doodin in la ansixyo sharci daro weeye.
- In cashuuraha aan sharciga ahayn sida tan wasaarada duulista iyo Hawada oo yiri golahaan horkeenaynaa, waxaan odhan lahaa intaanay Golaha horkeenin ha joojiyeen.

## 15. Xill. C/qaadir Jaamac Xaamud

Anigu waxaan qabaa in Gudi walba intaan miisaaniyada la keenin halkan meesha ay khusayso ka la soo shaqayso oo mashaariicda loo baahanyahay iyo wixii kale halkaa wasaarada laga soo galiyo, 2005kii meesha aynu joognay baynu wali joognaa mayna ahayn in Gudidda Dhaqaalaha oo kaliyi shaqayso.

Waxaa xaaraan ah in hay'ad aan la ansixin sharciyadeeda in lagu soo daro miisaaniyada, marka laga reebo mushaharooda waa in markay sharcigooda keenaan loo ansixiyaa, Mashaariicda horumarinta in miisaaniyada ay ku jirto ayay ahayd oo wax loo jaro sida Wadada Burco iyo Ceergaabo isku xidha oo sanadba in la sameeyo. Tvga qaranku waa muhiim kharash badana waa loo soo qoray dawladii hore satliteka ayay ku dartay, tan dalka ha wada gaadhsiiso, waxaan qabaa in Hay'adaha kharashka badan wax laga jaro oo caafimaadka iyo dhakhtarka wax looga jaro.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In la ansixyo si aan loo odhan Golahii baa la daahay, marka intaa lagu daro kaydka qaranka iyo Mashaariicda horumarinta

## 16. Xill. Maxamed X. Xuseen Ciise

Markaynu miisaaniyada ansixino waa inaan daba-galnaa oo aan markasta la soconaa iyo sida uu baxayo, markaan eegay miisaaniyadan waxaa ii muuqda dakhligii oo la kordhiyay waana dedaal ay wasaaradu samasay, mushaharkii shaqaalaha iyo ciidamada oo la kordhiyay waxaa inoo muuqdaa in miisaaniyadeena la kordhin karo, kharashkeena waan isku filayn siin karaa taasoo uu qabay wasiirku kana dhabeeyay.

Waxaan qabaa kaydka qaran in miisaaniyadaha danbe lagu soo daro, iminka laguma dari karo waxay ku haboon tahay miisaaniyada marka la samaynayo, markaa talo ahaan aan u raacino in miisaaniyadaha danbe lagu soo daro kaydka qaranka, sanadkan hadii ay noqotay in shaqaalaha iyo ciidamada loo kordhiyo mushaharka, sanadka danbe waa inaan wasaarada kula talinaa in mashaariic horumarineed la sameeyo oo aan daba galnaa.

Wasaarada maaliyada kharashkeedu wuu badan yaahy, waxaana is leeyaha waa daymihii badnaa ee xukuumada lagu lahaa, markaa in daymahaasi kordhiyeen baan filayaa, korodhku wuxuu u badan yahay waxyaabo macquula ee aan soo sheegnay, waa inaan waaqicaga ku dhaqanaa. Kharash iyo dakhli isku dheeli tiran weeye miisaaniyadani, wayna isu soo dhamaystireen, markaa waxaan qabaa in kayd qaran loo baahan yaahay laakiin aan iminka la dhexgalin Karin waxaana haboon ina talooyinka Miisaaniyada aan raacinayno lagu daro.

**Waxaan soo jeedinayaa gaba-gabadii:-**

- In sanadkan la siidaayo, talada Gudidda dhaqaalahana waan taageersanahay.

## 17. Xill. C/kariim Aw Cali Shabeel

Waxaa muhiima in Golaheenu wixii sax aynu ku taageerno, wixii khaladaad ah ee ku jirana aan ka saxno, miisaaniyadani waxay xambaarsantahay waxa ugu wayn waa kharashaad, laakiin kama muuqato wax shacabka Somaliland taabanaya, hawlaha dawlada wax lagu socodsiinayo mooyee,

waxaynu ognahay dhibaatada biyo yaraaneed ee jirta, wax biyaha caasimada oo aad u yar wax ugu jiraa ma jiraan, sidoo kale mashaariic haday tahay Mid xoolaha lagu horumarinayo ama Wadooyin waxba kagama jiraan.

Sidii xildhibaanadii hore sheegeen kayd qaran waan waa faqsanahay oo 30% kayd qaran laga dhigo iyadoo laga soo jarayo kharashayda yar yare ee aan mushaharku ku jirin, hay'adaha aan sharciga ahayn ee miisaaniyada ku jirana waxaan qabaa in mushaharka iyo shidaalka aan u sii dayno inta kalena marka sharciyadooda la dhamaystiro loo ansixiyo shaqadoodana wataan. Xaga wax soosaarka in wax loo dheego aad bay muhiim u tahay, waana loo baahan yahay.

Waxaan kaloo ka hadli lahaa Habka bangigeenu u shaqaynayo, oo xeerkiisiina dhamaystirnayn systemkiina aanu shaqaynayan, waxaan soo jeedinayaa in laga shaqaysiiyo, wasaarada maaliyada sababta intaa le'eg keentay maan garan, markaa hay'adaha kharashayda laga jarayo aha raacaan
Waxaan soo jeedinayaa:-

- In hay'adaha aan sharciga ahayn mushaharkooda iyo shidaal loo siidaayo shaqadana wataan, inta kalena markay 30 cisho sharcigood ku keenaan loo ansixiyo
- In kayd qaran la sameeyo iyadana waan waafaqsanahay, 30% kharashaadka laga jaro aanu ku jirin mushaharooyinku.

## 18. Xill. Maxamed Cumar Aadan

Wakhtiga dawladu jirtay oo yar, iyagoo bixiyay deymihii dawlada lagu lahaa, iyagoo kordhiyay mushaharkii shaqaalaha iyo ciidamada, waxaan filayaa in shaqada umadu intaa ka fiicnaan doonto, markaa inaan eegnaa wax qabadka dawlada oo marka hore macluumaad ka helnaa sida wax yihiin, aynu isku dayno in wixii basics ah in la qabto, yaynaan dawlada 6da bilood jirtay in wax kasta in la yidhaahdo sameeya,

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Miisaaniyadan aan ansixino, wixii talooyin ah ee loo baahan yahayna aynu raacino ayaan qabaa anigu.

## 19. Xill. Tukaale

**Waxaan soo jeedinayaa anigu:-**

- Kayd qaran waa la sameeyo, hadaan kayd qaran aan la samayn waa dhibaato.
- Hay'ada aan sharciyaysnayn waa in kharashaadkooda la joojiyaa inta sharcigoodii keenayaan ee loo ansixinayo.
- Wasaaradaha Arrimaha Dibada oo lacagta safarka ugu jirtaa ay yartahay in tan qurba jooga lagu soo daro.
- Shaqaalaha garsoorka wixii umada u kordhay way ka qatan yihiin, waa iyagana arrinkooda aad hoos loogu eegaa.
- Madaxwayne ku-xigeenka miisaaniyad u gaara ayuu lahaan jiray sidii caadada ahayd, ma garanayo sababta looga reebay, taana dib ha loo eego.

## 20. Xill. Rashiid

Kharashaadka Miisaniyada ee D/dhexe 2011 waxa uu kala baxaa sidan:
2:1:0:0 kharashka Shaqaalaha iyo Gunooyinka
2:2:1:0 Kharashka Hawsha Socota
2:2:2:0 Hantida raagta
2:2:3:0 Kharashka iibsiga adeeg qalabka hawsha
2:3:1:0 Daryeelka iyo dib u dhiska
2:3:2:0 Dhismayaasha cusub
2:6:3:0 kaalmooyinka

Hadaba markaan miisaaniyada guda galo waxaa ka muuqata in ay dedaashay wasaarada maaliyadu kuna talogashay sidii ay cashuuraha u soo saari lahayd, innagana waxaa inla gudboon inaan ka taageerno sidii cashuurta u ururin lahayd oo wixi xeer ah ee cashuuri kaga xidhan tahay aan dag dag wax uga qabano, una cadayno si hamiga wasaaradu u rumoobo.

Hadaba, aniga marka aan gudo galo buuga miisaaniyada 2011, waxaa uu xambaarsanyahay dakhli-kharashaad miisaaniyadeed ee sanadkan aan ku jirno, sidaa darteed hadii aan u leexdo dhinaca kharashaadka ku adagtahay sdii ay u dabakhi lahayd miisaaniyadan, dhinaca kharashaadka waxaa uu u kala baxaa todob madax xigen ee aan ku soo sheegnay, oo aan anigu u qaybiyay sidan:-

Mushaharka shaqaalaha iyo ciidama oo dhan 290,416,827.979 Sl sh=
Madax xigeenada kale waxay kala yihiin, Kharashka hawsha socota, hantida raagta khar Kharashka iibsiga adeeg qalabka hawsha, Daryeelka iyo dib u dhiska  Dhismayaasha cusub iyo Kaalmooyinka.

Hadaba anigu lixdan madax xigen ee danbe hal meel ayaan isugu guuriyay ay noqotay kharashka ku baxayaa waxyaabaha kale oo dhan marka laga reebo mushaharka ciidamada iyo shaqaalaha lacag ahaan dhan 229,880,918,344 marka labada xisaabood la isku darana waxay noqnaysaa 523,279,685,800 sl sh= saamigaas guud marka wasaaradaha loo kala qaado, oo hadii aan eego kuwa ugu kharashaka badan waxaa ka mida Ciidamada.

Sidaa darteed, markaan xisaabtaa dib u raacno waxaa muuqata lacagta ugu badan inay gasho ciidamada iyo nabadgalyada, waxaa kale intaa soo raaca wasaaradaha.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Habada markaan eegay arrimaha dhaqaale xumida xukuumada waxaan soo jeedinayaa, in aan ka go'yno 30% oo aan kayd qaran ka dhigno, 30% kaas oo dhan 45,790,361,559 sl sh- oo u dhiganta $8,325,520.
- Miisaaniyada Guud waxaa ay noqonaysaa 477,489,384,417 sl sh= oo u dhiganta $86,816,252, marka laga jaray 30%kii kayd aan ugu talagalno

## 21. Xill. Baar Siciid Faarax.

Waxaa inaga maqan wixii horumarka aha wax meesh qoran waa wada kharash, waa in talaabo la qaadaa, dawladu waa dawladii shacabka, markaa Biyaha dhibaato wayn baa inaga haystata markaa mashaariic biyaha lagu horumarinayo ayaa loo baahan yahay oo dadka anfacd, waxaan jeclaan lahaa in Gobol walba 10 biyo xidheen loo sameeyo oo biyaha durduraya aan xidhano kana faa'idaysano.

Ciidamada qaranku markay dhaawacmaan reerkoodii ayuu dhaawac ula tagaa, taasina qaranimo maaha ee waa in wax laga qabtaa, dhinaca beeyada dhaqaalihii ugu badnaa dawladii Somalia meelaha uu ka iman jiray waxaa ka mid ahaa beeyada, iyana waa in la dhiiri galiyaa,dhinaca wadooyinka Gobolka sanaag waa gobolka ugu khayraadka badan laakiin waxaa curyaamiyay wado la'aan.

Sicir barar baa dhacay oo saddexdii biloo ee ugu danbaysay sonkorta oo kale $27 ahayd waxay noqotay $34 markaa dhibaatadaasi dhamaan qowsaska way saamaysay, Baanka dhexe waa in laga shaqaysiiyaa oo uu noqdaa baan shaqaynaya sicir bararkaa lacagta ku dhacay uu wax ka qabtaa, garsoorka hadaan dhaqaale ku filan helin cadaalad heli mayno, taa Garsoorkana waa in la eegaa.

Waxaan Soo jeedinayaa:-

- In kayd qaran laga sameeyo miisaaniyadan oo 30$ kaa hore loo sheegay laga jaro kharashaadka,, iyo in Mashaariic horumarineed wax laga daro sida biyaha iyo wadooyinka.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agg. Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
------------------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
-----------------------------------------------------